TUSAALAHA CADEEYNTA
Isticmaalka cadeeyntaan waxaa ogolaaday RCW 7.70..

# Daryeelaha Qaraabada ah

## Cadeynta Masuuliyadda Daryeelka Caafimaadka Qof Aan Qaangaadhin

(Oo ay ku jiraan caafimaadka, ilkaha iyo caafimaadka maskaxda)

Waxa Aan Cadeynayaa in:

**Warka Qofka Aan Qaangaadhin:**

1. Waxa aan oggalahay daryeelka caafimaadka ee la siinayo ilmaha: ____________________
(magaca ilmaha oo ah xuruuf kala go'an)

2. Taariikhda uu ilmuhu dhashay waa: ________________

**Warka Daryeelaha:**

3. Magacaygu waa: ____________________________________________
(magaca oo ah xuruuf kala go'an)

4. Adreeska gurigaygu waa:____________________________________________
____________________________________________

5. Anigu waxaan jiraa 18 sanno ama ka weyn ama waxaan ahay qaraabo masuul ka ah caafimaadka illmaha oo ay ku jiraan caafimaadka, ilkaha iyo xanaanada caafimaadka maskaxda.

6. Taariikhda dhalashadaydu waa: ____________

7. Waxa aan ahay ______________________________ ilmaha aan qaangaadhin.
(qor waxa aad ilmaha u tahay, sida /ayeeyo, edo/habaryar, adeer/abti)

Waxa aan cadeynayaa iyada oo beensheegid la igu qaadi karo marka la eego sharciga Gobolka Washington in warka kore yahay run iyo sax.

Taariikh: ______________ Magaalo iyo Gobol: ______________________________

Saxeexa Daryeelaha: ____________________________________________
Cadeeyntani waxay soconaya lix bilood kaliya maalinta halkaan ku qoran.

## Gobolka Washington Shabakada Xanaanda Kinship

Warbixinta illaha, howlaha, daabacaada iyo waxyaabo dheeraad ah ka fiiri:
www.dshs.wa.gov/kinshipcare/

## Qoraalo Bilaash ah

Qaraabada oo ah Waalid: Tilmaan-bixiyaha Adeegyada ee Loogu Talogalay Qaraabada Ilmo ku Korinaya Gobolka Washington (Relatives as Parents: A Resource Guide for Relatives Raising Children in Washington State) (DSHS 22-996x) waa tilmaan-bixiye adeegyo oo qiime u leh dhamaan daryeeleyaasha qaraabada ah. Waxa uu buuggaa yari ka gargaaraa qoysaska Gobolka Washington inay helaan adeegyada, taageerada iyo warka ay u baahan yihiin inta ay korinayaan ilmaha qof qaraabo ah.

Si aad u heshid mid ka mid ah buuggaagtaa yaryar, tag **www.prt.wa.gov** ka dibna guji barta "General Store" ama wac Waaxda Daabacaadda (Department of Printing) oo leh lambarka 360-570-3062.

**Aging and Disability Services Administration**
**Maamulka Howlaha Waayeelnimada iyo Curyaamiinta**
Washington State Department of Social & Health Services
DSHS 22-1119x SM (Rev. 9/08)

# Oggalaanshaha Daryeel Caafimaad
oo la
# Siiyo Ilmaha Aad Haysid



## Tilmaan-bixiyaha Daryeelaha Qaraabada ah

Washington State
Department of Social & Health Services

## Marka aan ahay daryeele qaraabo ah, ma oggalaan karaa in daryeel caafimaad la siiyo ilmo aan hayo ama daryeelkiisa aan gacanta ku hayo?

**Haa.** Labo sharci oo gobolka* ayaa u ogolaanaya xanaano bixiyayaasha Kinship inay bixiyaan ogolaanshada xanaanada caafimaadka ilmaha markii aanu waalidku joogin. midaani waa run xataa haddii uusan asagu ama ayadu haysan sharciga haynta.

Marka aad tahay daryeele qaraabo ah, waxa aad oggalaan kartaa daryeelka caafimaadka ee la siinayo ilmo aan qaangaadhin haddii aad tahay qof qaangaadh ah oo:

- aad haysatid amar-siin uu soo saxeexay waalidka ilmuhu oo sheegaya inaad adigu gaadhi kartid go'aamo daryeel caafimaad oo ku saabsan ilmaha;
- aad tahay tahay qaraabo masuul ka ah daryeelka caafimaadka ee ilmaha; ama
- aad tahay daryeele qaraabo ah oo saxeexay taariikhdana ku qoray cadeyn (RCW 7.70.065).

## Waa maxay nooca xanaanada caafimaadka ku jira?

Xanaanda caafimaadka waxaa ku jiri kara caafimaadka, ilkaha ama caafimaadka maskaxda.

## Waa sidee haddii xanaano bixyahayga qaraabadaa uu ku lug leeyahay Maamulka Caruurta?

Qofka qaraabada ahi waxaa qasab ah inuu haysto amarka maxkamada si uu u ogolaado daaweynta caruurta ay u dhibeen Waaxda Howlaha Caruurta iyo Qoyska.

* **SHB 1281 (2005)**
Eegitaanka ogolaanshada xanaanada caafimaadka ilmaha qofka qaraabada qaangaarka ah.

**SHB 3139 (2006)**
Oo lagu daray xanaanada caafimaadka maskaxda.

## Waa maxay cadeyn?

Cadeyn waa dukumenti qoran oo la saxeexay taariikhdana lagu qoray oo sheegaya in warka meesha ku qorani run yahay. Marka aad tahay daryeele qaraabo ah oo qaangaadh ah, waxa aad saxeexi kartaa cadeyn aad ku leedahay inaad tahay qaraabo masuul ka ah daryeelka caafimaadka ee ilmaha aan qaangaadhin.

Inkasta oo sharcigu aan qasab ka dhigin cadeyn la saxeexay, waxa laga yaabaa in bixiyeyaasha daryeel caafimaad ay weydiiyaan cadeyn. Waxa qoraalkan laga heli karaa cadeyn tusaale ah ama waxa laga soo dajisan karaa internetka barta: www.washingtonlawhelp.org. Waxa aad isticmaali kartaa foomkan tusaalaha ah ama cadeyn ayaad gacantaada ku qori kartaa.

Maskaxda ku hay in cadeyntu "ay keeni karto in lagugu qaado dambi beensheegid marka la eego sharciga Gobolka Washington". Saxeexidda cadeyn aad og tahay inuu been yahay waa dambi noociisu yahay Darajada B (Class B felony).

## Intee in leeg ayay cadeyntu soconaysaa, maxaana aan sameeyee haddii ay dhacdo?

Cadeyntu waxay socotaa kaliya lix bilood laga bilaabo taariikhda la saxeexay. Cadeyntu way dhacaysaa, ka dib lix bilood. Waa inaad markaa buuxisaa oo aad saxeexid cadeyn kale.

## Saxeexidda cadeynta macnaheedu ma waxa weeye waxa aan leeyahay haynta sharciga ah ee ilmaha?

**Maya.** Saxeexidda cadeyntu waxa kaliya ee ay kuu oggalaanaysaa inaad oggalaatid daryeelka caafimaadka ee la siinayo ilmaha. Cadeyntu wax saameyn ah kuma laha haynta sharciga ah ee ilmaha ama xuquuqada sharci ee waalidka.

## Maxaa aan sameeyaa haddii bixiye daryeel caafimaad uu i weydiiyo marag-kac dheeraad ah inaan ahay qaraabo masuul ka ah daryeelka caafimaadka ee ilmaha?

Sharciga hada, bixiyayaashu waxaa ay ku weydiinayaan inaad tusto cadeeynta ah inaad adigu masuul ka tahay xanaanada caafimaadka ilmaha. Bixiyayaasha xanaanada caafimaadka waxaa ku jiri kara Bixiyayaasha caafimaadka, ilkaha ama caafimaadka maskaxda. haddii ay midaasi dhacdo, waxyaabahaan soo socda ayaa laga yaaba inay ku caawiyaan:

(1) Dardaaran sheegaya waxa aad u tahay ilmaha.
(2) Warqad uu soo qoray shaqaale bulsho, shaqaale dugsi, looyar ama qareen, culimo diin, ama xirfadle caafimaad, caafimaad maskax, ama dabeecad oo liisan leh oo muujinaysa waxa aad u tahay ilmaha.
(3) Diiwaano ama qoraalo ka yimi dugsi, cisbitaal, kiliinig, ama hay'ad caafimaad dadweyne ama adeeg bulsho oo muujinaya waxa aad u tahay ilmaha.
(4) Marag-kac ama cadeyn muujinaya inaad ilmaha u soo qaadid gargaarka dawladda, sida TANF, SSI, kuuboonka caafimaadka (medical coupons), gargaarka cuntada (food stamps) iyo qado dugsi oo bilaash ah/qiimaheeda la dhimay.
(5) Diiwaano ama qoraalo ka yimi Wasaaradda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (Department of Social and Health Services) oo muujinaya inaad adigu tahay qofka lagala soo xidhiidho ilmaha.
(6) Marag-kac ama cadeyn sheegaysa in ilmuhu uu ku nool yahay abaarmankaaga ama guriga aad joogtid adiguna aad qaraabo u tahay.
(7) Caymis aad adigu leedahay ama ilmuhu leeyahay oo sheegaya waxa aad isu tihiin.
(8) Celintaada Cashuurta Dakhliga ee Federalka (Federal Income Tax return) oo uu ku qoran yahay ilmuhu.
(9) Wixii kale ee ah dukumentiyo muujinaya waxa aad u tahay ilmaha ee sheegaya inaad tahay ilmaha u tahay daryeele.

## Halkee baan gargaar ka heli karaa?

Waxa jira dhawr hay'adoo oo teleefonka ku bixiya war sharci iyo gudbin bilaash ah iyo/ama war laga heli karo internetka.

# Wixii ah War

**The Coordinated Legal Education, Advice and Referral (CLEAR) (Hay'adda Waxbarashada Sharciga, La-talinta iyo Gudbinta)**

Haddii aad ka yar tahay 60 dakhligaaguna hooseeyo, wac: **1-888-201-1014***.

Haddii aad ka weyn tahay 60 dakhligaagu sida uu doono ha ahaadee, wac CLEAR adiga oo ka wacaya lacag la'aan lambaka **1-888-387-7111**.

Waxa aad cadeyn tusaale ah ka soo dajisan kartaa barta: **www.washingtonlawhelp.org**

**The Northwest Women's Law Center (Xarunta Sharciga ee Dumarka)**
Wac **206-621-7692** (waxa loogu talogalay dumarka iyo ragga labadaba)

Booqo rugta internetka ee ku taala barta: **www.nwwlc.org/**

* lagama heli karo degmada King County. Waa in daganeyaasha King County ay wacaan 206-464-1519 si ay u helaan war iyo gudbin.